TALLAABOOYINKA BUUXINTA DACWADA CAYMISKA SHAQO LA'AANTA

State of Oregon Employment Department

Kahor inta aadan codsan: Uruuri Xog

Si aad u xaraysato caymiska shaqo la'aanta, waa in aad sheegtaa magacaaga, Lambarka Bulshada, taariikhda dhalashada iyo macluumaadkaaga xiriirka. Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, waxaad isticmaali kartaa lambarkaaga USCIS, lambarka-A ama lambarka I-94.

Waa inaad keentaa taariikhdaada shaqo oo dhamaystiran 18-kii bilood ee la soo dhaafay.Tan waxaa ku jira magacyada loo-shaqeeyaha, ciwaanka iyo lambarada taleefanka loo-shaqeeyaha iyo taariikhda shaqada.

TALAABADA 01

Xaree Dacwad biloow ah

Onlayn: Ka Xaree lacagaha caymiska shaqo la'aanta halkan unemployment.oregon.gov/so.

Taleefoon: Wac **877-345-3484.**

TALAABADA 02

Xaree sheegashooyinka toddobaadlaha ah

Si aad u bilowdo helitaanka faa'iidooyinka shaqo la'aanta, waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad xerayso sheegashooyinka toddobaadlaha ah. Waa inaad sugtaa ilaa Axadda si loo gudbiyo sheegashada isbuucii hore.

Onlayn: Ka codso faa'iidooyinka isbuucii hore halkan frances.oregon.gov.

Taleefoon: Codso faa'iidooyinka isbuucii hore adigoo wacaya **800-982-8920**.

TALAABADA 03

U Diyaar garoow inaad shaqada ku soo laabato

Inaad shaqayn karto, diyaar u tahay inaad shaqeeyso oo si firfircoon shaqo u raadsato. Dadka qaata lacagta shaqo la'aanta waxaa

looga baahan yahay inay shaqo raadsadaan oo ay diiwaangeliyaan shaqo raadintooda.

Su’aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Waa maxay caymiska shaqala’aanta?

Caymiska shaqala’aanta waxa uu lacag siiyaa dadka shaqa la’aanta ah ama saacadahooda shaqada laga dhimay iyaga oo aan khalad lahayn. Lacag-bixinta toddobaadlaha ah waxay taageertaa dadka si firfircoon u raadsada shaqo.

Ma heli karaa caymiska shaqa la’aanta?

Shaqaale badan ayaa u qalma caymiska shaqa la’aanta, xitaa haddii loo shaqeeyaha uu sheego inay yihiin shaqaale aan joogto ahayn. Waa inaad leedahay taariikh shaqo 18-kii bilood ee la soo dhaafay, waxaana jira shuruudo kale oo mushahaar ah. Waxaan ku dhiirigelinaynaa dadka inay xareeyaan caymiska shaqa la’aanta si aan u siino faa’iidooyin kasta oo ay kasbadeen.

Goorma ayaan xareeyaa dacwada toddobaadlaha ah?

Si aad u sii hesho dheefaha, waxaad u baahan tahay inaad xarayso dacwad toddobaadle ah toddobaad kasta, marka lagu daro sheegashadaadii hore. Todobaadku waa Axad ilaa Sabtida. Waa inaad sugtaa ilaa Axadda si aad u soo gudbiso sheegashaadii isbuucii hore. Xaree sheegasho toddobaadle ah xitaa haddii aad shaqeysay isbuucaas.

Ka warran hadii aan shaqeeyay?

Waxaa laga yaabaa inaad weli u qalanto dheefaha haddii aad shaqeyso wax ka yar 40-tan saacadood oo aad samaysay wax ka yar qaddarkaaga faa’iidada toddobaadlaha ah. Hubi inaad ka warbixiso saacadaha aad shaqeysay isbuuca dhexdiisa. Waa inaad soo sheegtaa dakhligaaga guud isbuuc kasta, xitaa haddii aan weli wax lacag ah lagu siin.

Intee ayaan heli karaa?

Qadarka aad kasbatay muddada 12-ka bilood ah, ee loo yaqaan sannadka aasaasiga ah, ayaa go’aaminaya qaddarka faa’iidadaada toddobaadlaha ah. Faa’iidada ugu yar iyo tan ugu badan ee toddobaadlaha waxaa dajiyay sharciga.

Ma u baahan tahay caawimaad?

Macluumaadkani waa mid aad u muhiim ah. Waaxda Shaqaalaynta ee Oregon (The Oregon Employment Department, OED) waa wakaalad leh fursad loo siman yahay. OED waxay ku siineysaa caawimo bilaash ah si aad u isticmaasho adeegyadeena. Tusaalooyinka qaarkood waa luqadda dhegoolaha iyo tarjumaannada luuqada lagu hadlo, agab ku qoran afaf kale, far waaweyn, maqal iyo qaabab kale. Si aad caawimo u hesho, fadlan ku dhufo unemployment.oregon.gov/so oo guji Nala Soo xiriir ama naga soo wac 877-345-3484. Isticmaalayaasha TTY waca 711.